



## La taliyayaasha waxay u shaqeyn karaan qof weyn oo lagu kalsoon yahay ahaan kuwaasi oo loogu talagalay ardayda

*Christy Wheeler oo ka tirsan Dugsiga Dhexe ee Sellwood Middle School ayaa dhawaan ku guuleystay La taliyaha Sanadka ee Dugsiyada Oregon iyada oo ay u doorteen Ururka La taliyayaasha ee Dugsiyada Oregon. Waxaan ka codsanay iyada in ay nala wadaagto fikradaheega ku aadan doorka la taliyayaashu ka ciyaaraan bulshada dugsiga.*

La taliyayaasha xirfada leh ee dugsiga inta badan waa udub-dhexaadka dugsiyadooda. Waxay si dhow ila shaqeeyaan qof kasta oo ka tirsan dhismahooda iyo bulshadooda. La taliyayaashu waxay waxyaabo badan ka sameeyaan dhismaha dugsiga si ay u taageeraan carruurta, iyada oo labadooduba ay la xiriiraan guusha tacliimeed iyo fayo-qabka dhanka dareenka/bulsho ahaaneed.

Waalidiintu waxay inta badan taageero ka raadiyaan la taliyayaasha dugsiga marka ilmahoodu uu si lama filaan ah u muuqdo in ay dhibaato ku haysato guriga ama dugsiga. Macallimiinta waxay taageero raadiyaan marka ay u baahan yihiin tilmaan ah dhanka taageerida ardayda laga yaabo in ay halis ugu sugan yihiin ku guuldareysiga dugsiga, ay jirto in ay iska ilaalinayaan in ay wax qabtaan ama leh hab-dhaqan ay in loo fiirsado ku raadinayaan 'attention-seeking' taasi oo dhibaato u soo jiidaysa. Maamulayaashu waxay si dhow ula shaqeeyaan la taliyayaasha taasi oo ku saabsan nidaamyada dugsiga iyo istiraatiijiyado si loo abuurro jawi wanaagsan oo ammaan ah.

Ahaanshaha la taliyaha dugsiga dhexe ee dugsi ay dhigtaan 615 arday, isla markaana hal la taliye oo wakhti buuxda shaqeeya iyo hal la taliye oo wakhti dhiman shaqeeyaa ay kala qaybsadaan laba dugsi, wuxuu noqon karaa mid aad u dhib badan. Buuxinta dhammaan baahiyaha ay qabaan ardaydu maalin kasta iyo wada shaqeynta macallimiinta, waalidiinta iyo maamulka waxay qaadataa sabir iyo aragti la wadaago oo ah in ardayda oo idil, marka ay haystaan taageerada saxda ah, ay guuleysan karaan dugsiga dhexdiisa iyo mustaqbalkooda.

La taliyanimada dugsi ma aha daaweyn; waa mid kooban oo diiradda la saarayo xal. La taliyayaashu waxay waqti ku qaataan fasallada dhexdooda iyaga oo baraya casharro horumarineed oo ku haboon kuwaasi oo la xiriira dunida isbeddelaysa ee ku xeeran. Waxay la kulmaan ardayda iyaga oo kooxo yar yar ka kooban si ay u sameeyaan waxka qabasho ballaaran waxayna si shakhsi ahaan ah ula kulmaan ardayda ay marxalado adag ay nolosha ka haystaan isla markaana u baahan dhageysi iyo erayo taageero ah oo aan su'aalo la iswaydiinaynin.

Hadafkayagu la taliyaha dugsiga ahaan waa in aan doonayo in ardayda ka tirsan dhismahaygu ay ogaadaan in aan halkan u joogo iyaga, isla markaana aan iyaga aaminsanahay. Carruurta oo idil waa in ay ugu yaraan yeeshaan hal qof oo weyn oo lagu kalsoon yahay oo dugsiga jooga oo ay u tegi karaan haddii ay caawimaad u baahan yihiin. Qofkaasi weyn ee lagu kalsoon yahay ee ay carruur badani leeyihiin waa la taliyaha dugsiga.